

Qofka carruuri ay u dhigato dugsiga xannaanada

2020-11-24

Ilaa iyo inta ay carruurta guriga joogeyso markey xannuunsadaan

Salaamaad!

Qaar badan oo ka mida mas'uuliyiinta daryeelka carruurta ayaa qaba su'aalo la xiriira ilaa iyo inta ay carruurta guriga joogeyso markey xannuunsadaan. Halkan ayeynu taa ku sharaxeynaa.

Goormey carruurta tagi karaan dugsiga xannaanada goormeyse tahay iney guriga joogaan marka ay jirto dhibaato kala duwan taasoo calaamada u noqon karta covid-19?

Waxa muhima iney carruurta guriga joogto oo aaney tegin dugsiga xannaanada markey xannuunsan yihiin. Tan ayaa shaqeyneysa iyadoon loo eegin nooca xannuunka. Infakshanka ayaa socon kara muddo gaaban ama daba dheeraan kara iyadoona inta ay carruurta guriga joogeyso ay ku xiran tahay haddii uu infakshanku yahay mid gaaban ama mid daba dheeraada.

Tan baa shaqeyneysa marka dhibaataadu tahay mid kooban oo dhaqsa u dhamaata

Mararka qaar ayey carruurta ku jirta da'da dugsiga xannaanada, 1-6 sanno jirka, dhibaataadoodu tahay mid fudud oo dhaqsa u dhamaato, taasina calaamad uma aha xannuun. Markaa carruurta uma baahna iney ka joogaan dugsiga xannaanada ama in guryaha lagu xannaaneeyo. Taas ayaa tusaale ahaan noqon karta qufac kooban ama diif sanko ka socda marka ay carruurta dibedda joogto. Waa dhibaatooyinka dhaqsaha u dhamaada.

Tan baa shaqeyneysa marka xannuunku socdo muddada gaaban

Waxaa mararka qaar carruurta ku dhici kara xannuun waqtigiisu gaaban yahay, kaasooy muddada uu socdo ay ka yar tahay 24 saac. Waxey taa tusaale ahaan noqon kartaa in carruurta la soo kaxeeyo calaamadaha fudud darteed. Haddii aaney calaamaduhu isku beddelin infakshan isla markaana aan calaamad lagu arag carruurta maalinta xigta, markaa wuxuu ilmuhu guriga joogayaa laba maalmood oo calaamad la'aana.

Tan baa shaqeyneysa xilliga calaamaduhu dhaafaan muddo 24 saaca

Haddii ay carruurta leedahay calaamado muddo ka badan 24 saac waa inuu ilmuhu markaa guriga joogaa ugu yaraan 7 cisho isla markaana aan lagu arag calaamadaha cudurka labada maalmood ee ugu danbeeyey inta aanu dib ugu noqon dugsiga xannaanada.

Marka ilmuhu guriga joogo 7 cisho infakshan dartii

Carruurta ka joogtay dugsiga xannaanada 7 cisho infakshan dartii kadibna bogsata waxey dib ugu noqon karaan dugsiga xannaanada ama iskuulka. Tan baa shaqeyneysa xataa haddii uu ilmuhu wali qabo calaamado fudud sida diifa yar ama qufac. Diifka haraaga iyo qufaca socda hargabka kadib ma aha wax aan caadi aheyn wuxuuna carruurta qaar sii heyn karaa dhowr todobaad. Tani ma aha caqabad keeneysa in ilmuhu ka joogo dugsiga xannaanada.

Bogga interneta ee degmada, norrkoping.se ayaad ka heleysaa warbixintii ugu danbeysay adiga ay carruurta ku dhigato dugsiga xannaanada ama iskuul. Booqo bogga: www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola.html

Mahadsanidiin
Xafiiska waxbarashada